

Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka 19 Nofembar 1970, lamba. 241

Dhismaha Guddiga Joogtada ee ilaalinta shanaamooyinka dadweynaha

**GUDDOOMIYAH
GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Warqadda Koowaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969 iyo Xeerka lamba. 1 ee 21 Oktoobar 1969;

Marka uu arkay Sharciga Nabadgalyada Dadweynaha, oo la meelmariyay 26 Agoosto 1963 lamba. 21;

Marka uu garowsaday in ay tahay lagama maarmaan in la nidaamiyo qaybta shanaamooyinka dadweynaha, dhinaca uljeedooyinka caafimaadka, nabadgalyada iyo ka hortagga shilalka awgood;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Waxaa la dhisay Guddi joogto ah oo loo xilsaaray wax qabadka goobaha bandhigiyayada dadweynaha horay u jiray iyo kuwa mustaqbalka la samaynn doono.

Qod. 2

Wajiga labaad ee hirgalinta, guddiga waxaa laga dhisay Muqdisho, isagoo ka hawlgalaya dhammaan Gobolka Banaadir, wuxuuna ka koobanyahay xubnaha soo socda:

- | | |
|---|--------------|
| a) Gudoomiyha Ciidan ee Gobolka Banaadir | — Guddoomiye |
| b) Taliyaha Qaybta Boliiska Gobolka Banaadir | — Xubin |
| c) Taliyaha Ciidanka Dab Damiska | — Xubin |
| d) Xaafiska Caafimaadka Gobolka | — Xubin |
| e) Injeeer Dhismo ee ka socda Wasaradda Hawlaha Guu | — Xubin |

Qod. 3

Dekereeto uu soo saaro Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa lagu magacaabi karaa guddi kan la mida oo ka hawlgala Gobollada kale ee Dalka.

Qod. 4

Guddigu wuxuu u xilsaaranyahay hawlaha soo socda:

- 1) — in uu ka talo bixiyo mashaariicda masraxyada iyo goobaha kale ee bandhigiyada dadweynaha iyo wax ka baddal muuqda oo lagu sameeyo kuwii horay u jiray;
- 2) — xaqijinta xaaladaha lagu adkaynayo, nabadgalyada iyo faya-dhowrka goobahaas iyaga ah, iyo in ay tilmaamaan tallaabootyinka iyo taxadarka loo baahanyahay, dhinaca danaha faya-dhowrka amaanka hortagga shilalka;

- 3) — ilaalinta lagu joogtaynayo shuruucda ay tahay in la dhowro iyo taxddarrada la iska rabo, in farsamooyinka loo baahanyahay ee ammaanka ay si joogta u socdaan, marka loo tilmaamo wixii tallaabooyin ah.

Qod. 5

Wixii la xariiraha goobahii horay Muqdisho uga jiray, guddiga lagu soo sheegay qod. 2, waa in ay sameeyaa faaqidaadda lagu taliyay, 30 cisho gudahood oo ka bilaabata marka la magacaabay, wixii talaabo looga baahanyahay goobahaas iyaga ah in ay leeyihiin, haddii aanay horay u hayasan, shuruudaha lagu soo sheegay qdobka 4 ee xagga sare.

Qod. 6

Dekeretadaan waxay dhaqangalaysaa maalinta ku xigta marka lagu faafiyo Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 19 Nofembar 1970.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Wasiirka Arrimaha Gudaha

S. Guuto Xuseen Kulmiye Afrax